

Waa sharciga!

Loo shaqeeyaashu waa inay ogaysiiska ku soo daabacaan meel shaqaaluhu ka akhriyi karaan

Shuruucda Mushaharka iyo Wakhtiga Dheeraadka ah ee shaqada

Shaqaalaha waa in lasiiyaa mushaharka ugu yar ee Washington

- Badanaa shaqaalaha 16 jirka ama kawayn waa in lasiiyaa ugu yaraan mushaharka ugu yar dhamaan saacada ay shaqeeyeen. Eeg www.Lni.wa.gov/MinWage.
- Shaqaalaha da'doodu tahay 14 ama 15 waxa la siin karaa 85% mushaharka ugu yar.
- Gunnooyinka dadka loo shaqaynayo laga helo maaha in loo xisaabiyo musharka ugu yar. Loo shaqeeyayaashu waa inay bixiyaan dhamaan gunnooyinka shaqaalahooda.

Mushaharka wakhti dheeraadka ah ee la shaqeeyaa waxaa la qaataa marka la shaqeeyo wixii ka badan 40 saacadood

Badanaa shaqaalaha waa in lasiiyaa hal saacad iyo badh xadiga caadiga ah ee ay mushaarka ku qaataan ee dhamaan saacadaha ka badan 40 saacadood saacadaha caadiga ah shaqada todobaaka u degsan.

Shaqaaluhu Waxay U Baahan Yihiin Wakhti Wax Cunis iyo Nasasho ah

Wakhtiga cuntada

Badanaa shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan 30 daqiiqo oo cunto ah oo aanay mushahar ku qaadanaynin haddii ay shaqeeyaan wax ka badan shan saacadood maalintii. Haddii ay qasab tahay inaad ku sii jirto shaqadaada wakhtigaaga cuntada, waa in aad mushaharka ku qaadataa 30 daqiiqo oo aad shaqaysay. Shaqaalaha beeraha waxay xaq u leeyihiin inay helaan 30 daqiiqo oo labaad oo cunto cunis ah oo aanay mushahar ku qaadanaynin haddii ay shaqeeyaan wax ka badan 11 saacadood maalintii. Wax badan ka baro www.Lni.wa.gov/MealAndRestBreaks.

Nasashooyinka

- Badanaa shaqaalaha waxa xaq u leeyihiin 10 daqiiqo oo nasasho ah oo ay mushahar ku qaadanayaan afartii saacadood ee ay shaqeeyaan ba kadib, waana inaanay shaqaynin wax ka badan sadex saacadood iyaga oo aan nasan.
- Shaqaalaha beeruhu waa inay nastaan 10 daqiiqo oo mushahar ay ku qaadanayaan afartii saacadood ee ay shaqeeyaanba.
- Haddii aad ka yartahay 18 sano, fadlan fiiri "Geeska Dhalinyarada" oo ka muuqda dhanka midig.

Shuruudaha Mushaharka

Mushaharka maalinlaha ah

Shaqaalaha waa inay helaan mushaharka ugu yaraan hal mar bishii maalinta loo qoondeeyay mushaharka ee caadiga ah. Loo shaqeeyuhu waa inay kusiiyaan bayaanka/warqad muujinaysa tirada saacada aad shaqaysay, xadiga mushaharka, tirada qaybaha mushaharka (haddii ay tahay qayb shaqo ah), isugaynta mushaharka, wakhtiga mushaharka lagu bixiyay iyo dhamaan wixii laga jarayo ee laga qaatay.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan ka jarista sharciga ah, booqo www.Lni.wa.gov/Wages ka dibna guji nd click on "Paycheck deductions."

Sharciga Mushaharka loo simanyahay iyo Fursadaha

Sharcigan, loo shaqeeyaha waa ka mabnuuc inuu siiyo mushar aan sinayn ama fursado dalacaad shaqada ah taas oo ku salaysan jinsiga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad soo bandhigto, isbarbar dhigto, ama aad ka wada hadashaan wixii mushahar ah ama mushaharka shaqaalaha kale. Cida aad u shaqaysaa talaabo kaagama qaadi karto marka aad ka hadasho mushaharka, cabasho aad gudbisno, ama aad xuquuqdaada ka faa'idasato ilaalinta ee hoos timaada Equal Pay Opportunity Act (Sharciga Sinaanta Mushaharka iyo Fursadaha) Sidoo kale loo shaqeeyaha waxa ka mamnuuc ah inuu dalbado taariikhda hore ee musharka codsadaaha oo lagu soo qoro arjiga shaqada, marka laga tago xaaladaha qaar, sidoo kale laguma waajibin karo arjiga shaqada in lagu soo qoro mushaharka si loo buuxiyo shuruudaha qaar. Cida shaqada soo dalbanaysaa waxay sidoo kale xaq u leeyihiin macluumaadka mushaharka qaar haddii cida loo shaqaynayaa ay haysato 15 shaqaale ah ama wax ka badan. Wixii macluumaad intaas ka badan ama si aad u gudbisno cabasho, booqo www.Lni.wa.gov/EqualPay.

Geeska Dhalinyarada — Xogta ku saabsan shaqaalaha da'doodu u dhaxayso 14–17

- Guud ahaan da'da ugu yar ee shaqadu waa 14, waxaana jira shuruuc kala gedisan oo quseeya da'aha 14-15 iyo da'aha u dhaxeeya 16–17.
- Loo shaqeeyuhu haysataa fasaxa shaqaalaysiinta ilmaha si ay u shaqaalaysiinayaan dadka dhalinyarada ah. Tani waxaa ku waajibtaa xubnaha qoyska marka laga reebo qoysaska beeralaya ah. Kuraydu uma baahna ogolaanshaha shaqada.
- Dhalinyarada waxaa loo baahan yahay in ay haystaan foomka ogolaanshaha ah oo saxeexan kahor inta ayna bilaabin shaqada. Shaqada xagaaga, waalidku waa inuu saxeexaa Parent Authorization for Summer Work form (Ogolaanshaha Waalidka ee Foomka Shaqada Xagaaga Ogolaanshaha Waalidka ee Foomka Shaqada Xagaaga). Haddii aad shaqaynayso inta lagu jiro fasaxa waxbarashada, waalidka iyo sarkaalka ka socda dugsigu waa inay saxeexaan foomka Parent/School Authorization form (foomka ogolaanshaha waalidka/dugsiga Ogolaanshaha Waalidka/Dugsiga).
- Shaqooyin badan looma ogola dadka ka yar 18 badbaadadooda darteed.
- Saacadaha shaqada kuraydu way xadidan yihiin, waliba waxay sii xadidanyihiin maalmaha waxbarashada ee todobaadka.

Wakhtiga cuntada iyo nasashada ee kurayda/dhalinta

- Shaqooyinka beeraha, kurayda da' kastaa waa inay helaan 30 daqiiqo cunto cunis ah, haduu uu shaqeeyo wax ka badan shan saacadood, iyo 10 daqiiqo oo uu mushahar ku qaadanayo afartii saacadood ee kasta.
- Dhamaan shaqooyinka kale oo dhan, kurayda ah 16 ama 17 waa inay qaataan 30 daqiiqo oo wakhtiga cuntada ah haddii ay shaqeeyeen wax ka badan shan saacadood, iyo 10 daqiiqo oo nasasho mushahar leh ah afartii saacadood ee la shaqeeyo. Waa inay helaan wakhti nasasho ugu yaraan sadexdii saacadoodba.
- Kurayda da'doodu tahay 14 ama 15 waa inay helaan 30 daqiiqo oo wakhtiga cuntada ah oona ka danbaynin dhamaadka saacada afaraad, iyo 10 daqiiqo oo nasasho ah labadii saacadood ee ay shaqeeyaan.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goobta shaqada ee kurayda/dhalinta booqo: www.Lni.wa.gov/TeenWorkers, 1-866-219-7321, TeenSafety@Lni.wa.gov.

Sharciga Fasaxa

Fasaxa bukaanka ee lacagta lagu qaato

Shaqaalaha badankoodu waa inay helaan ugu yaraan mushaharka hal saac oo fasax bukaan ah oo ay mushahar ku qaadanayan 40 kii saacadood ee ay shaqeeyeenba. Fasaxan waxaa la adeegsan karaa laga bilaabo maalinta 90 aad ee mudada shaqaaluhu shaqeeynaayay. Loo shaqeeyuhu waa inuu siiyaa shaqaalaha cadayn uu ku jiro wixii u uruuray oo dakhli ah, la isticmaalay iyo saacada la heli karo ee fasaxa ah ugu yaraan hal mar bishii. Warbixintan waxaa lagu bixin karaa bayaanka warbixinta ee caadiga ah ee mushaharka ama wargelin gaar ah. Shaqaalaha waa in loo ogolaadaa inay ula wareegi karaan ugu yaraan 40 saacadood fasax xanuun oo mushahar lagu qaadanayo oo ayna isticmaali karaan sanadka xiga. faahfaahinta isticmaalka la oggolaaday, faahfaahinta aruurinta, iyo u-qalmitaanka, fiiri www.Lni.wa.gov/SickLeave.

Washington Family Care Act (Xeerka daryeelka qoyska ee Washington): Isticmaalka fasaxa mushaharka leh si loo daryeelo qof ehel ah oo xanuunsanaya

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay doortaan siday u isticmaalayaan wixii fasax mushaharka lagu qadanayo ee la siiyo sida (xanuun, dalxiis, qorshayaal gaar ah oo xiliga dhaw ah oo la xidhiidha laxaad la'aan, ama wixii kale ee wakhti fasax ah oo mushahar leh) si ay ugu daryeelaan:

- Cunug qaba xaalad caafimaad oo u baahan daaweyn ama kormeeritaan;
- Xaaska, waalidka, xididka, ama awowga ama ayeeyada ee qabta xaalad caafimaad oo daran ama xaalad caafimaad oo gurmada degdeg ah u baahan; iyo
- Caruurta 18 sano jirka ah ama kawayn ee qabta laxaad la'aanta kuwaas oo aan is daryeeli karin.
- Wixii macluumaad dheerad ah, eeg www.Lni.wa.gov/FamilyCareAct.

Fasaxa la siiyo dadka dhibanayaasha u ah xadgudubyo maxali ah, xadgudubyo dhanka galmada ah

Dhibanayaasha iyo xubnahooda qoyska waxaa loo ogol yahay inay qaadaan talaabo ah ee macquul ah oo ay fasax kaga qaadanayaan shaqada iyaga oo helaya taageero sharci sida, daawaynta caafimaadka, latalinta, meel kale u wareegida, kulamada cida u ololeysa dhibanayaasha fal danbiyeedyada, ama inay ilaaliyaan badbaadadooda. Loo shaqeeyaha waxa kale oo looga baahanyahay inay siiyaan hoy macquul ah dadka dhibanayaasha ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg www.Lni.wa.gov/DVLeave.

Fasaxa lamaanayaasha militariga inta lagu jiro dagaal-gelinta

Xaaaska ama lamaana ay wada nool ee duwaan gashan inay yihiin shakhsiyada ciidan ah kuwaas oo heley wargelin in furinta hore ay tagayaan ama kuwaas oo ku jira fasax ay furinta hore kaga yimaadeen inta uu socdo dagaalu waxa ay qaadan karaan isugayn 15 maalmood oo fasax bilaa mushahar ah halkii mar ee faranta la geeyaba.

loo shaqeeyahaagu kuguma eryi karto ama kaagama aargudan karo marka aad xuquuqdaada fulinayso, ama buuxinayso cabasho la xidhiidha mushaharkaaga ugu yar, saacaha la shaqeeyay ee deheraadka ah, fasaxa xanuunka ee mushaharka leh ama wixii kale fasaxa ilaalo ah.

Waxaa maamula hay'ado kale

Fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee mushaharka leh: Waxaa maamula Waaxda Amniga Shaqada ee Washington. Washington waxay siisaa shaqaalaha faa'iidooyinka fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee mushaharka leh Barnaamijka caymiskan waxaa lagu maalgeliyaa lacagta caymiska ee bixiyaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaal badan. Shaqaalaha waxa loo ogolyahay ilaa 12 todobaad, kolba sida baahidu tahay, marka ay u xafladaynayaan ilmo cusub oo u dhashay qoyska, marka uu ku dhaco xanuun ama dhaawac xun, ama ay u baahan yihiin fasax ay ku daryeelaan qof qaraabada ah oo xanuunsanaya, caafimaadkiisu liito, iyo marka ay jiraan munaasabada la xidhiidha ciidanka. www.paidleave.wa.gov.

Fasaxa laxaad la'aanta uurka: Oo uu dhaqan geliyo Gudida Xuquuqda Bilaa Aadanka Gobolka Washington sida uu dhigayo Sharciga Ladagaalanka Takoorka Gobolka Washington (Washington State Law Against Discrimination, Sharciga ladagaalanka Takoorka ee Gobolka Washington (WSLAD)). www.hum.wa.gov ama 1-800-233-3247

Sharciga fasaxa qoyska iyo caafimaadka: ee ay maamusho Waaxda shaqaalaha ee maraykanka. Shaqaalaha u qalma waxay adeegsan karaan xaquuqdooda fasaxa ilaalinta qoyska iyo fasax caafimaad sida ku cad Xeerka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (Family and Medical Leave Act, FMLA) iyaga oo la xiriiraaya Waaxda Shaqada www.dol.gov/whd/fmla ama 1-866-487-9243.

La xidhiidh L&I (Shaqada&Warshadaha)

Wixii macluumaad ama kaalmo dheeraad ah



www.Lni.wa.gov/workers-rights

Wac: 1-866-219-7321, wicitaanku waa bilaash

Booqo: www.Lni.wa.gov/Offices

Limeel u dir: ESgeneral@Lni.wa.gov

Boorarka goobta shaqada ee loo baahan yahay

Booqo www.Lni.wa.gov/RequiredPosters si aad wax badan uga ogaato waraaqaha goobta shaqada ee L&I iyo hay'ada ee dawlada kale.

Tahriibinta dadku waa sharci daro

Wixii caawimada dhibanayaasha quseeya, ka wac xarunta ka hortaga tahriibinta dadka (National Human Trafficking Resource Center) lambarkan 1-888-373-7888, ama Xafiiska Gobolka Washington ee U doodista Dhibanayaasha Dembiga (Washington State Office of Crime Victims Advocacy) lambarkan 1-800-822-1067.

Marka la codsado, taageerada luqadda ajnabiga ah iyo qaababka dadka naafada ah waa la heli karaa. Wac 1-800-547-8367. Isticmaalayaasha TDD, waca 711. L&I waa loo-shaqeeye leh fursado loo siman yahay.